

## TUSMO

|  |    |
|--|----|
| // Erayga Wasiirka                                       | 3  |
| // Erayo la soo Gaabiyey                                 | 5  |
| // 1. Hordhac  | 6  |
| // 2. Falanqaynta Xaaladda Guud ee ICT-da dawladda       | 6  |
| // 3. Caqabadaha ka jira ICT-da Dawladda                 | 7  |
| // 4. Hiigsiga, Ujeedooyinka iyo Xuduudda Siyaasadda     | 7  |
| // 4.1 Hiigsiga Siyaasadda                               | 7  |
| // 4.2 Ujeedooyinka Siyaasadda                           | 7  |
| // 4.3 Xuduudda Siyaasadda                               | 7  |
| // 5. Maamulka ICT-da Dawladda                           | 8  |
| // 5.1 Maaraynta ICT-da Dawladda (ICT Governance)        | 8  |
| // 5.2 libka Agabka ICT-da Laamaha Dawladda              | 9  |
| // 5.3 Maamulidda Mashaariicda ICT-da Laamaha Dawladda   | 11 |
| // 5.4 Kaabayaasha ICT-da Laamaha Dawladda               | 14 |
| // 6. Halbeegyada iyo Hagayaasha ICT-da Laamaha Dawladda | 15 |
| // 7. Amniga Xogta (Information Security)                | 15 |
| // 7.1 Ilaalinta Goobta Kaydka Xogta                     | 15 |
| // 7.2 Ilaalinta Xogta iyo Nidaamyadeeda                 | 15 |
| // 8. Cilmi Baadhista iyo Horumarinta ICT-da             | 16 |
| // 9. Tubta Hirgalinta Siyaasadda ICT-da Dawladda        | 16 |
| // 9.1 Muddada Dhaqan-galka Siyaasadda                   | 16 |
| // 9.2 Doorka iyo Masuuliyadda Hirgalinta Siyaasadda     | 17 |
| // 9.3 Dabagalka iyo Qiimaynta fulinta Siyaasadda        | 17 |

# Erayga Wasiirka

Waxaa sharaf u ah Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknoolajiyadda in ay dhammaystirto Siyaasadda Teknoolajiyadda (ICT) Dawladda, iyada oo ay tahay markii ugu horaysay ee la sameeyo siyaasad loogu talo galay in lagu hago ICT-da dawladda.

Waxaa sidoo kale sharaf u ah Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknoolajiyadda in ay samayso daraasad lagu ogaanayo heerka adeegsiga ICT-da ee laamaha dawladda iyada oo la kaashanaysa Kuliyadda ICT-da ee Jaamacadda Hargeysa si loo ogaado xaaladda dhabta ah ee ICT-da dawladda. Haddaba, iyada oo ka duuleysa natiijada ka soo baxday daraasadda la sameeyey Wasaaraddu waxa ay diyaarisay Siyaasadda Maamulka ICT-da Dawladda.

## ***Ujeedooyinka laga leeyahay diyaarinta siyaasaddan waxa ka mid ah:***

1. Helidda teknoolajiyad tayadeedu sarayso.
2. Xakamaynta kharashka ku baxa ICT-da dawladda.
3. Ilaalinta bedqabka xogta dawladda.
4. Ilaalinta agabka lagu kaydinaayo xogta ICT-da dawladda.
5. Xoojinta iyo kor u qaadidda isku xidhnaanta dawladda.
6. Samaynta cilmi baadhisyo lagu horumarinayo ICT-da dawladda.
7. Tayaynta iyo kobcinta aqoonta iyo xirfadaha shaqaalaha ICT-da dawladda.

## ***Siyaasaddani waxa ay xoogga saaraysaa dhinacyada soo socda:***


- ◊ U dejinta ICT-da halbeegyo iyo hagayaal cilmiyaysan
- ◊ Tayaynta Maamulka ICT-da Dawladda
- ◊ Tayaynta Maaraynta Mashaariicda ICT-da dawladda.
- ◊ Horumarinta Aqoonta ICT-da dawladda.

U gogol-xaadhka hirgalinta Dawlad ku shaqaysa qaab elektorooniga ah (e-government)

Waxa aan halkan uga mahadnaqayaa hormoodka Kuliyadda ICT-da ee Jaamacadda Hargeysa oo si hagar la'aan ah ugala shaqeeyay Wasaaradda samaynta daraasadda. Waxa kale oo aan halkan uga mahadnaqayaa shaqaalaha Wasaaradda ka tirsan ee doorka weyn ka qaatay diyaarinta siyaasaddan dadaal badanna ku bixiyay si loo dhamaystiro siyaasaddan oo ugu dambeyntii la hor keenay Golaha Wasiirada Somaliland.

Mahadsanidin.

*Dr. Cabdiweli Sh. Cabdillahi Soufi*  
Wasiirka Isgaadhsiinta iyo Teknoolajiyadda.



## Erayo la soo gaabiyay

WIT: Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknoolajiyadda.

ICT: Information Communication Technology

PPP : Public Private Partnership



# 1. HORDHAC

Sida ku cad daraasadda ay wada sameeyeen WIT iyo Kuliyadda ICT-da ee Jaamacadda Hargeysa ee lagu ogaanayo heerka isticmaalka ICT-da laamaha dawladda waxa ka soo baxay arrimahan soo socda:

- » In 95% ka mid ah laamaha dawladdu aanay lahayn miisaaniyad loogu talo galay ICT-da.
- » In 76% ka mid ah shaqaalaha dawladdu aanay ku qalabaysnayn kaabayaasha ICT-da ee ay ku gudan lahaayeen waajibaadkooda shaqo.
- » In 62% ka mid ah laamaha dawladdu aanay lahayn Waax/Qayb uga masuul ah ICT-da.
- » In 77% ka mid ah laamaha dawladdu xogta ay leeyihiin aanay lahayn wax ilaaliya bedqabka xogta.

Sidaas darteed, WIT oo ka duulaysa warbixinta ka soo baxday daraasadda lagu sameeyey ICT-da laamaha dawladda, waxa ay diyaarisay siyaasadda Maamulka ICT-da Dawladda. Haddaba siyaasaddani waxa ay:

- ◇ Xallinaysaa goldaloolooyinka ka soo baxay daraasaddii la sameeyay
- ◇ Noqonaysaa hage iyo halbeeg tilmaamaya sida loo horumarinayo ICT-da dawladda.
- ◇ Awoodda saaraysaa xallinta dayacnaanta ka jirta Maamulka, Adeegsiga, Amniga iyo Bedqabka Xogta.
- ◇ U horseedaysaa horumar teknoolajiyadeed laamaha dawladda..
- ◇ U noqonaysaa gogolxaadh hirgalinta Xukuumadda oo ku shaqaysa qaab elektoroonig ah (e-government).

## 2. Falanqaynta Xaaladda Guud ee ICT-da dawladda

ICT-du waxa ay ka qayb qaadataa fududeynta iyo dardar galinta hawlaha shaqo ee laamaha dawladda, hadaba si looga faa'iidaysto ICT-da waxa loo baahan yahay in kor loo qaado aqoonta iyo xirfadda shaqaalaha dawladda ee ICT-da isla markaana la helo agab iyo barnaamijyo suurto galiya ka midho-dhalinta qorshayaasha dawladda. Xaaladda ICT-da laamaha dawladda ee haatan waxa laga dheehan karaa:

- \* Dabacsanaan ka muuqata maamulka iyo adeegsiga ICT-da.
- \* La'aan qorshe midaysan oo ICT-da loogu talo galay.
- \* Isku xidhaan la'aan ka jirta ICT-da dawladda dhexdeeda.

- \* Dayacnaan ka muuqata amniga iyo bedqabka xogta ICT-da dawladda.
- \* Arimaha kor ku xusan waxa ay keeneen in dawladdu heli waydo faa'iidooyinka uu leedahay adeegsiga ICT-du kharashaadka ku baxaana aanay noqon kuwo wax ku ool ah.

### 3. Caqabadaha ka jira ICT-da Dawladda

Caqabadaha hadda jira ee dib u dhigaya ka faa'idaysiga kaabayaasha ICT-da waxa ka mid ah:

- \* Wacyiga ICT-da oo aad u hooseeya dawladda dhexdeeda.
- \* Masuuliyiinta dawladda oo aan ku baraarugsanayn waxtarka ICT-da.
- \* Heerka farsamo iyo aqooneed ee ICT-da laamaha dawladda oo aad u hooseeya.
- \* Shuruuc iyo xeerar lagu hago ICT-da oo aan jirin ( ICT Legal Frame) .
- \* Qoondayn la'aan miisaaniyad ku filan kaabayaasha ICT-da dawladda.
- \* Qaab-dhismeedka laamaha dawladda oo aanay ka muuqan waaxaha/qaybaha ICT-du.
- \* Mashaariicda ICT-da ee laamaha dawladda oo aan si habsami leh loo fulin.

### 4. Hiigsiga, Ujeedooyinka iyo Xuduudda Siyaasadda

#### 4.1 Hiigsiga Siyaasadda

Hiigsiga siyaasaddani waa:

"Dawladda Somaliland oo u adeegsata ICT-da kobcinta dhaqaalaha iyo horumarinta adeegyada ay bulshadda u fidiso si loo helo Dawlad hufan, waxtar leh oo lala xisaabtami karo, islamarkaana kobcisa sinnaanta bulshadda iyo horumarinta xirfadda ICT-da"

#### 4.2 Ujeedooyinka Siyaasadda

Siyaasaddan waxa looga gol leeyahay kor u qaadista iyo ka faa'idaysiga adeegsiga ICT-da laamaha dawladda, dejinta halbeegyada iyo hagayaasha lagu maarayn doono ICT-da dawladda.

#### 4.3 Xuduudda Siyaasadda

Siyaasaddani waxa ay ka dhaqan galaysaa dhamaan laamaha dawladda ee Jamhuuriyadda Somaliland.

## 5. Maamulka ICT-da Dawladda

Maamulka iyo maaraynta hufani waxa ay saldhig u yihiin habsami u socodka hawl kasta oo la qabanayo, hadaba si loo horumariyo ICT-da dawladda sida Maamulidda ICT-da dawladda, libka Agabka ICT-da, Maamulidda mashaariicda ICT-da, Kaabayaasha ICT-da, Halbeegyadda iyo Hagayaasha ICT-da, Amniga Xogta Kaydsan, Cilmi baadhista iyo horumarinta waa in la hirgaliyo qodobadan soo socda:

### 5.1 Maaraynta ICT-da Dawladda (ICT Governance)

Si kor loogu qaado maareynta ICT-da dawladda waxa la hirgalinayaa talaabooyinkan hoos ku xusan:

- a. **Qaab Dhismeedka ICT-da Dawladda:** ICT-du waxay ka mid tahay kaabayaasha dhaqaale ee ugu mudan ee qaranku leeyahay, si hadaba looga midho dhaliyo waxa uu yeelanayaa maamulka ICT-da dawladdu qaab dhismeedkan hoos ku xusan:
  - » **Guddida Qaran ee Kor Joogteynta ICT-da Dawladda:** Waxa la asaasayaa Guddi heer Wasiirro ah oo kormeerta xaaladda ICT-da dawladda, waxaana hoogaaminaysa WIT.
  - » **Wasaaradda Isgaadhsiinta iyo Teknoolajiyadda:** waxa ay u xilsaaran tahay dajinta, hirgalinta iyo kormeerka siyaasadaha, halbeegyada iyo hagayaasha ICT-da dawladda. Waxa kale oo ay wasaaraddu u xil saarantahay isku xidhka iyo dabagalka ICT-da laamaha dawladda.
  - » **Waaxaha/Qaybaha ICT Laamaha Dawladda:** Laamaha dawladdu waa inay yeeshan waax/qayb ICT oo u xilsaaran maaraynta ICT-da ee heer Hay'adeed.
- b. **Qorshayaasha iyo Qoondaynta Miisaaniyadda:** Si loo xaqiijiyo yoolka horumarinta ICT-da Dawladda, dhammaan laamaha dawladdu waa inay yeeshaan Qorshe iyo Miisaaniyad sanadeed daboolaa baahidda ICT-da ee laamaha dawladda.
- c. **Iskuxidhka Waaxaha ICT-da Laamaha Dawladda:** Si kor loogu qaado wada shaqaynta iyo ka faa'idaysiga ICT-da Laamaha dawladda, WIT waxa ay:

- » Udub dhexaad u noqonaysaa dhamaan waaxaha/qaybaha ICT-da laamaha dawladda.
  - » Qaban qaabinaysaa afar kulan sanadkii oo ay yeeshaan dhamaan Waaxaha/Qaybaha ICT-da laamaha dawladdu, si loo mideeyo qorshayaasha iyo hawlgalka ICT-da laamaha dawladd, isla markaana la isu waydaarsado xogaha korna loogu qaado wada shaqayntooda.
- d. **Kormeerka iyo Qiimaynta ICT-da Dawladda:** Si loo joogteeyo ka faa'iidsiga loolana socdo xaaladda ICT-da laamaha dawladdu ku sugan yihiin, isla markaana kor loogu qaado taageerada la siinayo, WIT waxa ay:
- » Ka helayso waaxaha ICT-da laamaha dawladda warbixin sadex biloodle ah oo ku saabsan xaaladda ICT-da.
  - » Samaynaysaa kormeero ay ugu kuur-galayso xaaladda ICT-da laba jeer sanadkii.
  - » Diyaarinaysaa hagayaasha kormeerka iyo qiimaynta.
  - » Soo saaraysaa warbixin lix biloodle ah.
  - » Qaadaysaa talaabo kasta oo lagu xallinayo goldalooladda ka soo baxay qiimaynta iyada oo la kaashanaysa laamaha dawladda ee ay khusayso.

## 5.2 *libka Agabka ICT-da Laamaha Dawladda*

Laamaha dawladdu waxa ay u fidiyaan dadwaynaha Somaliland adeegyo kala duwan, hadaba si loo dardar galiyo loona fududeeyo fulinta adeegyadaasi waxa laamaha dawladdu u baahan yihiin in ay helaan agab ICT oo ku haboon hawsha ay qaranka u hayaan. Sidaa darteed, waxa ay WIT dajinaysaa habka iibka ICT-da laamaha Dawladda iyadoo la kaashanaysa hay'adaha kale ee dawladda u xilsaaran iibka si loo helo agab tayo leh, qiimahooduna macquul yahay, isla markaana qabanaya hawlaha shaqo ee looga baahanyahay. libka agabka ICT-da laamaha dawladda waxa lagu maaraynayaa qodobadan soo socda:



- a. **Sugida Baahida Agabka ICT-da Laamaha Dawlada:** Si loo hubiyo baahida dhabta ah ee laamaha ICT-da dawladda, WIT waxa ay:
  - » Xaqiijinaysaa baahida shaqo ee keentay codsiga iibka.
  - » Qiimaynaysaa tirada iyo tayada qalabka ICT-da ee hore u yaalay hay'adda dawladeed.
  - » Talo bixin ka samaynaysaa codsiga iibka qalabka ee laantu soo gudbisay, iyadoo ka duulaysa qodobada kor ku xusan.
- b. **Qeexida Tilmaamaha Farasamo ee Agabka ICT-da:** WIT waxa ay dajinaysaa isla markaana hirgalinaysaa tilmaamaha farsamo (technical specification) ee looga baahan yahay qalabka ICT-da ee laamaha dawladda si :
  - » Loo hubiyo tayada agabka la soo iibsano.
  - » Loo mideeyo noocyadda qalabka
  - » Loo xakameeyo kharashaadka aan loo baahnayn ee ku baxa.
  - » Loo fududeeyo tababarada looga baahan yahay adeegsiga qalabka.
  - » Loo fududeeyo isku xidhka iyo isqaadashada qalabka (Integration and Comptability).
- c. **Hannaanka Iibka Agabka:** Hannaanka iibka agabka ICT ee laamaha dawladdu waxa uu marayaa talaabooyinka soo socda:
  - » Diyaarinta codsiga agabka ICT-da ee laamaha dawladda.
  - » Qabashada WIT ee codsiga laamaha dawladda.
  - » Hubinta baahida agab ee laamaha dawladdu inay waafaqsan yihiin tilmaamaha farsamo ee agabka ICT-da.
  - » U gudbinta codsiga Guddiga Qandaraasyada Qaranka ka dib marka ay ogolaato WIT.
  - » Ka mid noqoshada WIT go'aan qaadashada iibka qalabka.
- d. **Hubinta la Wareegidda Agabka:** Si loo hubiyo in qalabka la soo iibiyay uu buuxiyay tilmaamihii farsamo iyo qandaraaskii la bixiyay, waxa ay WIT qaadaysaa tallaabooyinkan soo socda:
  - » Helidda hab-raaca (Manual) la socda qalabka iyo qaan-sheegaha (invoices) lagu soo iibiyay.

- » Helidda caddaymaha dammaanad-qaadka (Warranty) ee qalabka.
- » Xaqiijinta sifooyinka farsamo ee qalabka (Technical Features).
- » La wareegidda iyo ku-wareejinta qalabka laantii soo codsatay.

### **5.3 Maamulidda Mashaariicda ICT-da Laamaha Dawladda**

Xukuumadda JSL sannad walba waxa ay bixisaa mashaariic lagu horumarinayo kaabayaasha ICT-da laamaha dawladda, waxa ku baxa mashaariicdaa hanti badan oo ka timaadda miisaaniyadda qaranka, deeqaha hay'adaha caalamiga ah iyo heshiisyo dawladdu la gasho maalgashadayaal, hantida ku baxda qalabka ICT-du uma qalanto midhaha ka soo baxa mashaariicdaas sababo ay ka mid yihiin:

- Ka baaran-degid la'aan baahida dhabta ah ee mashruuca loo bixiyay.
- Shuruudaha shaqo ee looga baahan-yahay mashaariicda ICT-da oo aan caddayn.
- Hab-Maamulka mashaariicdaas oo aan gaadhsiisnayn heerkii lagaga midho-dhelin lahaa.
- Aqoonta maamulidda mashaariicda ICT-da oo aan xoogganayn.
- Aqoonta farsamo ee mashaariicda ICT-da oo hoosaysa.
- Kormeerka iyo qiimaynta fulinta mashaariicda oo aan jirin.
- Dabagal la'aanta fulinta mashaariicda ICT-da dalka.

Hadaba, si loo xalliyo cilladaha guud ee kor ku xusan, WIT waxa ay fulinaysa qodobadan soo socda:

- a. **Sugida Baahida Mashruuca:** Si loo hubiyo baahida dhabta ah ee keensanaysa in la fuliyo mashruuca waxa ay WIT:
  - » Xaqiijinaysaa baahida shaqo ee keentay codsiga mashruuca.
  - » Qiimaynaysaa xaaladda iyo awoodda fulineed ee laanta dawladda soo codsatay mashruuca.
  - » Ka talo bixinaysaa codsiga mashruuca ee laanta dawladdu soo gudbisay, iyadoo ka duulaysa qodobadaa kor ku xusan.
- b. **Qeexidda Shuruudaha Shaqo ee Looga Baahan yahay Mashruuca (Defining Business Requirements):** Si loo xaqiijiyo midh-dhalka mashruuca (Project deliverables), WIT waxa ay:

- » Dajinaysaa hagaha qeexida shuruudaha shaqo ee mashaariicda.
- » La diyaarinaysaa laamaha dawladda shuruudaha shaqo ee mashruuca.
- » Hubinaysaa in mashruucu buuxiyay shuruudaha shaqo ee hore loo dajiyay.

**c. Miisaaniyadda Mashaariicda:** Ilaha maal-galineed ee mashaariicda ICT-da laamaha dawladda waxa ka mid ah:

- » Miisaaniyad Sanadeedka Qaranka.
- » Deeqaha ka yimaadda deeq-bixiyayaasha Caalamiga ah.
- » Is-kaashiga dawladda iyo maal-gashadayaasha (PPP).

Haddaba, si looga faa'iideeyo maal-gashiga kala duwan ee mashaariicda WIT waxa ay:

- » Hubinaysaa iskuna sargoynaysaa miisaaniyadda mashruuca iyo wax soo-saarkiisa.
  - » Hubinaysaa miisaaniyadda ay deeq-bixiyayaasha caalamiga ahi ugu talo-galeen mashaariicda ICT-da laamaha dawladda.
  - » Hubinaysaa nooca heshiiska mashruuca ee ka dhaxeeya dawladda iyo maal-gashadayaasha (PPP Contract).
- d. Baaxadda iyo Noocyada Mashaariicda:** Iyada oo ay kala duwan tahay baahiyaha ICT ee mashaariicdu daboolayso, sidoo kalena ay kala baaxad weyn yihiin xag kharash iyo xag maamulba waxa ay keensanaysa in mashaariicda loo kala qaybiyo heerar kala duwan, haddaba WIT waxa ay:
- » Dajinaysaa tilmaamaha baaxadda iyo heerka mashaariicda ICT-da.
  - » Haleel-siinaysaa mashaariicda ay laamaha dawladdu soo codsadeen tilmaamaha loo dhigay.
- e. Qorshaynta Mashaariicda:** Maadaama ay tahay dabeecadda mashaariicdu curinta adeegyo cusub oo aan hore u jirin oo fududaynaya shaqada laamaha dawladda waxa ay u baahan tahay in si cilmiyaysan loo qorsheeyo.
- Haddaba, WIT iyada oo adeegsanaysa halbeegyada caalamiga ah ee loo adeegsado qorshaynta mashaariicda ICT-da waxa ay:

- » Dajinaysaa tilmaamaha qorshaynta mashaariicda.
  - » Hubinaysaa waafaqsanaanta tilmaamaha qorshayaasha ee mashaariicda.
  - » Dajinaysaa tilmaamaha maareynta wax-ka-beddelka fulinta mashaariicda.
- f. **Maaraynta Khataraha Mashaariicda:** Mashruuc kasta oo la fulinayo waxa ka hor iman kara khataro (Risks) kala duwan kuwaas oo caqabad ku noqon kara ka midho-dhalinta iyo habsami u socodka mashruuca, haddaba si loo maareeyo khatarahaas WIT waxa ay:
- » Dajinaysaa tilmaamaha maareynta khataraha mashaariicda.
  - » Hubinaysaa maareynta khataraha mashaariicdu in ay waafaqsan yihiin tilmaamaha maareynta khataraha mashaariicda.
  - » Hubinaysaa fulinta maareynta khataraha mashaariicda socota.
- g. **Hirgalinta Mashaariicda:** Hirgalinta mashaariicda ICT-da ee laamaha dawladda iyada oo la waafajinayo tilmaamayaasha iyo hagayaasha loo dejiyey waxa ay saldhig u yihiin midho-dhalka mashruuca, haddaba si loo gaadho yoolkaa, WIT waxa ay:
- » Dejinaysaa tilmaamaha hirgalinta mashaariicda.
  - » Hubinaysaa in hirgalinta mashaariicdu waafaqsan tahey tilmaamaha loo dejiyey.
  - » Hubinaysaa is-waafaqsanaanta fulinta iyo qorshaha mashriicda.
  - » Ka talo-bixi naysaa xallinta caqabadaha ka hor yimaadda hirgalinta mashriicda.
- h. **Kormeer iyo Qiimeyn:**
- » Kormeerka iyo qiimeynta mashaariicdu waxa ay laf-dhabar u yihiin gaadhidda ujeedooyinkii laga lahaa mashruuca, waxa kale oo ay fududeeyaan ka hortagga khataraha ku soo fool-leh mashruuca iyo sixitaanka xagal-daaca ku iman kara fulinta, haddaba si loo helo ujeedooyinkaas WIT waxa ay:
  - » Dejinaysaa tilmaamaha kormeerka iyo qiimaynta mashaariicda.
  - » Hubinaysaa in kormeerka iyo qiimayntu la jaanqaadayaan tilmaamaha loo dejiyay.



- » Ka helaysaa warbixin la xidhiidha kormeerka iyo qiimaynta ay laamaha dawladdu ka sameeyeen mashaariicda.
- » Samaynaysaa kormeer iyo qiimayn lagu daba galayo habsami u socodka fulinta mashaariicda iyo warbixinaha ay soo gudbiyaan laamaha dawladdu.
- » Soo saaraysaa warbixinno ku saabsan kormeerka iyo qiimaynta mashriicda.

**i. Dhamaadka Mashaariicda (Project Closing)**

Dhamaadka mashruuc kastaa waa halka lagu gaadhayo isla markaana lagula wareegayo midhaha ka soo baxay mashruuca haddii lagu guulaystay ama lagu soo afjarayo fulinta mashruuca haddii laga gaadhi waayo ujeedadii laga lahaa. Haddaba, si loo hubiyo in lagu soo xidho mashruuca qaab cilmiyaysan WIT waxa ay:

- » Dejinaysaa tilmaamaha iyo hagaha dhamaadka mashruuca.
- » Dejinaysaa tilmaamaha iyo hagaha la-wareegidda midhaha mashruuca.
- » Hubinaysaa is-waafaqsanaanta shuruudaha shaqo ee mashruuca iyo midhaha ka soo baxay.
- » Diyaarinaysaa warbixin caddaynaysa dhamaadka mashruuca.
- » Diyaarinaysaa warbixin la xidhiidha casharradii laga bartay hirgalinta mashruuca.

#### **5.4 Kaabayaasha ICT-da Laamaha Dawladda**

Laamaha dawladdu waxa ay u baahan yihiin kaabayaal suurto galiya habsami u adeegsiga ICT-da, hadaba si ay kaabayaasha ICT-du u fududeeyaan hawlaha shaqo, ugana badbaadaan dayac iyo waxyeelo ku yimaadda, WIT waxa ay suurto galinaysaa qodobadan soo socda:

**a. Diyaarinta Deegaanka Agabka iyo Barnaamijyadda ICT-da**

- » Dejinaysaa tilmaamaha iyo hagaha diyaarinta deegaanka agabka iyo barnaamijyada la dhigayo.
- » Hubinaysaa in goobta la dhigayo agabka ICT-du waafaqsan yahay tilmaamaha loo dejiyay.
- » Ka soo saaraysaa warbixin xaaladda deegaanka ICT-da dawladda .

- b. **Rakibaadda iyo Tijaabinta Agabka iyo Barnaamijyada ICT-Da (Installation, Testing and Commissioning )**
  - » Dejinaysaa tilmaamaha rakibaadda iyo tijaabinta agabka iyo barnaamijyada.
  - » Hubinaysaa in rakibaadda iyo tijaabintu ay waafaqsantahay tilmaamaha.
  - » Ka soo saaraysaa warbixinno la xidhiidha rakibaadda qalabka iyo barnaamijyada.
- c. **Hannaanka Isticmaalka Agabka iyo Barnaamijyada ICT-da**
  - » Dejinaysaa tilmaamaha iyo hagayaasha isticmaalka agabka iyo barnaamijyada.
  - » Hubinaysaa in qaabka isticmaalka agabka ICT-du uu waafaqsan yahay tilmaamaha loo dejiyay .
  - » Ka soo saaraysaa warbixinno la xidhiidha hanaanka isticmaalka agabka.
- d. **Ilaalinta iyo Dayactirka Agabka iyo Barnaamijyada ICT-da**
  - » Dejinaysaa tilmaamaha iyo hagayaasha ilaalinta iyo dayactirka agabka iyo barnaamijyada.
  - » Hubinaysaa in ilaalinta iyo dayactirka agabka ICT-da ay waafaqsan tahay tilmaamaha loo dejiyay.
  - » Ka soo saaraysaa warbixinno ilaalinta iyo dayactirka agabka.

## **6. Halbeegyada iyo Hagayaasha ICT-da Laamaha Dawladda**

WIT iyadoo gudanaysa waajibaadka shaqo ee ay qaranka JSL u hayso, waxa ay curinaysaa halbeegyo iyo hagayaal kor loogu qaadayo ka faa'iidaysiga isticmaalka ICT-da, iyada oo ka dhimbiil qaadanaysa hagayaasha iyo halbeegyada caalamiga ah ee ay ka mid yihiin halbeegyada Agabka ICT-da, Barnaamijyada ICT-da, libsigaa Agabka ICT-da, Ilaalinta xogta, Galaangalka maamulka, Agabka ICT-da iyo Halbeegyada Shabakadaha ICT-da IWM.

## **7. Amniga Xogta (Information Security)**

Ilaalinta Xogtu waxa ay ka mid tahay tiirarka ugu muhiimsan ee ammaanka qaranka, WIT iyada oo xaqiiqadaa ka duulaysa waxa ay diyaarinaysaa halbeegyo, hagayaal iyo talaabooyin lagu sugayo ilaalinta bedqabka xogta qaranka sida:

### **7.1 Ilaalinta Goobta Kaydka Xogta**

Si loo sugo bedqabka xogta waxa lagama maarmaan ah in goobta xogtu ku kaydsantahay ay tahay goob ammaan ah, sidaa darteed WIT waxa ay:

- a. Diyaarinaysaa hagayaal iyo tilmaamayaal lagu maamulayo ammaanka goobaha xogta lagu kaydinaayo.
- b. Hubinaysaa in goobaha lagu kaydinaayo xogta qaranku waafaqsan tahay hagayaasha iyo tilmaamaha loo dejiyay.
- c. Si joogta ah u kormeeraysaa goobaha xogta lagu kaydiiyay.
- d. Ka soo saaraysaa warbixin lix biloodle ah heerka iyo xaaladda amniga goobta/goobaha xogta lagu kaydiiyay.

### **7.2 Ilaalinta Xogta iyo Nidaamyadeeda**

Xogta ICT-du waxay ka mid tahay hantida ugu mudan ee qaranku leeyahay waxa ayna u baahantahay in markasta amnigeedu yahay mid sugan si looga badbaadiyo loogana hortago dhamaan khataraha ku iman kara sida: jabsashada, xatooyada, been-abuurka, beddalaadda, tirtiridda, burburinta, qiimo-tirka, dayacnaanta, khalkhalinta iyo u adeegsiga sifo aan sharci ahayn, sidaa aawadeed WIT waxa ay:

- e. Diyaarinaysaa hagayaal iyo tilmaamayaal lagu maamulayo Qaabka ilaalinta Xogta ICT-da dawladda.
- f. Hubinaysaa in qaabka ilaalinta xogtu waafaqsan tahay hagayaasha iyo tilmaamaha loo dejiyay.
- g. Kormeeraysaa si joogta ah bedqabka xogta iyo nidaamyadeeda.
- h. Ka soo saaraysaa warbixin lix biloodle ah oo qeexaysa heerka ilaalinta xogta ICT-da.

## 8. Cilmi Baadhista iyo Horumarinta ICT-da

Mudadii Somaliland jirtay lama samayn marna qorshe iyo miisaaniyad ku filan cilmi baadhista iyo horumarinta ICT-da si loola jaan qaado isbadalka teknoolajiyadeed ee ka socda dunida, taasina waxay dib u dhigtay horumarkii laga gaadhi lahaa isticmaalka ICT-da dawladda. Haddaba, iyada oo WIT ka duulaysa baahida loo qabo in la helo cilmi baadhis ICT oo ka tarjumaysa baahida teknoolajiyadeed ee laamaha dawladda lagana gaadho horumar wax-ku-ool ah waxa ay:

- i. Dejinaysaa qaab dhismeed isku dubarida dedaalada lagu kobcinayo cilmi baadhista iyo horumarinta ICT-da.
- j. Qoondaynaysaa miisaaniyad lagu kobcinayo cilmi baadhista iyo horumarinta ICT-da dawladda.
- k. Dhiirigalinaysaa samaynta Cilmi baadhisyo la xidhiidha horumarinta ICT-da dawladda iyada oo u raadinaysa deeq iyo maalgashi.

## 9. Tubta Hirgalinta Siyaasadda ICT-da Dawladda

Siyaasadan waxa dhaqan galinaya dhammaan daneeyayaasha ICT-da dawladda sida madaxda, shaqaalaha dawladda, iyo cid kasta oo xidhiidh la leh ICT-da dawladda. Haddaba, fulinta siyaasaddani waxa ay ka kooban tahay qodobada soo socda:

### 9.1 Muddada Dhaqan-galka Siyaasadda

Siyaasaddan waxa lagu hirgalinayaa muddo lix bilood gudahood ah oo ka bilaabmaysa maalinta Golaha Wasiiradu ansixiyo.

### 9.2 Doorka iyo Masuuliyadda Hirgalinta Siyaasadda

Waxa leh mas'uuliyadda dhaqangalka siyaasadan:

Guddida Qaran ee Kor Joogteynta ICT-da Dawladda: Guddidani waxa ay kormeereysaa hirgalinta siyaasaddan.

WIT:Wasaaraddu waxa ay udub dhexaad u tahay hirgalinta siyaasaddan iyadoo la kaashanaysa laamaha dawladda.

Waaxaha/qaybaha ICT-da:Waaxaha/qaybaha ICT-da ee laamaha dawladda oo xilsaaran hirgalinta iyo ku dhaqanka siyaasaddan heer hay'adeed.

### 9.3 Dabagalka iyo Qiimaynta fulinta Siyaasadda

WIT waxay samaynaysaa dabagal iyo qiimayn joogto ah muddada dhaqan-galka siyaasadda, si ay u hubiso fulinta siyaasaddan. Waxa aanay soo saari doontaa warbixinno ay u gudbin doonto Guddida ICT-da ee Qaran oo ku saabsan heerka fulinta siyaasadda.